



## Codsiga Deeqda Xasilinta Dhaqaale Xumada Daryeelka Ilmaha: Abriil 2022

Xeerka Qorshaha Samatabixinta Mareykanka waxaa sharcigiisa la saxiixay gudaha Maarsu 2021, wuxuuna Minnesota siiyay lacago dheeraad ah oo loogu talagalay inay gacan ka geystaan xasilinta hawlaho daryeelka carruurta iyadoo gobolku sii wado ka soo kabashada safmareenka COVID-19. Dhammaadka bishii Juun, [Sharci-dejinta Minnesota ayaa abuureen barnaamijka Deeqda Xasilinta Daryeelka Ilmaha ee Minnesota](#). Iyadoo qayb ka ah barnaamijka Deeqda Xasilinta Daryeelka Ilmaha, Deeqaha Dhaqaale Xumada waxaa loogu talagalay in lagu taageero barnaamijyada daryeelka ilmaha kuwaasoo wajahaya dhaqaale xumo oo aad u daran.

Bixiyeyasha waa inay buuxiyaan ugu yaraan mid ka mid ah saddexda shuruudood ee u-qalmitaanka ee la xiriira dhaqaale xumada ee bixiyahooda. Tafaasiisha shuruud kasta waxaa laga heli karaa bogga mareegta Deeqda Xasilinta Dhaqaale Xumada ee Daryeelka Ilmaha (<https://mn.gov/dhs/partners-and-providers/grants-rfps/child-care-stabilization/financial-hardship/>).

Codsadayaashu waxay dooran karaan inay codsadaan iyadoo la buuxinayo hal ama in ka badan shuruudaha barnaamijkooda. Dhammaan su'aalaha la xiriira shuruudaha gaarka ah waa in laga jawaabaa si loo go'aamiyo u-qalmitaanka sida ku cad shuruudahaas. Hubi inaad si taxadar leh u akhriso dhammaan maclumaadka oo dib-u-eeg tafaasiisha ku jirta caddaynta kahor inta aadan soo gudbin codsigaaga.

### Ka caawinta buuxinta codsigan

Si lagaaga caawiyo buuxinta codsigan, fadlan kala xiriir Hay'adda Ka Warqabto Daryeelka Ilmaha ee Minnesota (Child Care Aware of Minnesota) lambarka 651-290-9704 ama iimaylka [supportfunds@childcareawaremn.org](mailto:supportfunds@childcareawaremn.org).

- Si necesita ayuda para comprender esta carta, comuníquese con Rocio Sosa, [rsosa@thinksmall.org](mailto:rsosa@thinksmall.org), 651-641-6660
- Hadaad ubaahantahay caawimaad fahanka warqadan, fadlan la xiriir Abdulkadir Warsame, [awarsame@thinksmall.org](mailto:awarsame@thinksmall.org), 651-641-6673
- Yog tias koj xav tau kev pab nkag siab tsab ntawv no, thov hu rau Julie Yang, [JYang@thinksmall.org](mailto:JYang@thinksmall.org), 651-366-6792

Fadlan ka eeg Su'aalaha Inta Badan Lana Weydiyo (FAQs) ee Deeqda Dhaqaale Xumada bogga mareegta (<https://mn.gov/dhs/partners-and-providers/grants-rfps/child-care-stabilization/financial-hardship-faq/>) si aad u hesho shuruudaha u-qalmitaanka dheeraadka ah iyo maclumaadka kale.

## Buuxinta Codsigan

Maadaama aad tahay shati haystaha barnaamijka Daryeelka Ilmaha ee Qoyska oo awoodin inaad ku soo gudbiso codsigaaga onlaynka, codsigan warqadda ah ayaa diyaar kuu ah si aad u codsato Deeqda Xasilita Dhaqaale Xumada Daryeelka Ilmaha ee Abril 2022. Codsiyan waxaa ku jira caddaynta Deeqda Dhaqaale xumada, fadlan si taxadar leh u eeg. Codsiyan waa in la saxiixaa oo loo diraa Hay'adda Ka Warqabto Daryeelka Ilmaha ee Minnesota (Child Care Aware of Minnesota):

Child Care Aware of Minnesota

10 River Park Plaza, Suite 820

Saint Paul, MN 5510

**Codsiyada waa inay calaamada rasmiga ee boostada lahaadaan ugu dambayn Maayo 9, 2022.**

Waxaad u baahan doontaa mid ka mid ah Lambarkaaga Macluumaadka Loo-shaqeeyaha ee Dawladda Dhaxe (FEIN) ama Lambarka Sugnaanta Bulshada (SSN) ee shati-haystaha si aad u dhammaystirto codsigan.

## Macluumaadka Codsadaha Barnaamijka

1. **Magaca barnaamijka shatiyasan sida uu ugu yaalo shahaadada shatiga barnaamijka:**  
\_\_\_\_\_
2. **Barnaamijkaagu shati ma ka haystaa Waaxda Adeegyada Aadanaha mise Qabaa'ilka Dhaladka ah?**  
\_\_\_\_\_  
Waaxda Adeegyada Aadanaha ee Minnesota

Lambarka shatiga ee Waaxda Adeegyada Aadanaha sida uu ugu yaalo shahaadada shatiga ee barnaamijka (lambarka 6 ama 7-god ah): \_\_\_\_\_

\_\_\_\_\_  
Qabaa'ilada Asalka ah

*Tixraacyada ku jira codsigan ee "barnaamijkaaga" waxay la xiriiraan lambarka shatiga ee barnaamijka ee ku jira su'aasha #2.*

3. **Ciwaanka goobta barnaamijka** \_\_\_\_\_
4. **Magaalada goobta barnaamijka:** \_\_\_\_\_
5. **Baaqa boostada ciwaanka goobta ee barnaamijka:** \_\_\_\_\_
6. **Degmada goobta barnaamijka:** \_\_\_\_\_

## Macluumaadka Wakiilka Barnaamijka

7. Magaca buuxa ee sharciga ah ee shati haystaha barnaamijka:

---

8. Ciwaanka iimaylka ee shati haystaha barnaamijka (Haddii aad ku guuldareysato inaad bixiso ama aadan lahayn ciwaanka iimaylka, ma heli doontid iimaylka xaqiijinaya codsigaaga in la dhammaystiray. Si kastaba ha noqotee, jawaabahaaga weli waa la kaydin doonaa):  

---
9. Lambarka telefoonka ee shati haystaha barnaamijka:  

---

## Su'aalaha Codsiga

10. Barnaamijkaagu ma shaqaynayay oo ma u adeegayey carruurta intii lagu gudajiray Janaayo 1, 2022, ilaa Maarsa 31, 2022, muddada maalgelinta (xirnaanshaha kumeelgaarka ah waa la oggolyahay inta lagu gudajiro muddadan) OO ma furnaa tan iyo Oktoobar 22, 2021?

Haa

Maya

Shuruudaha warbixinta dawladda dhexe ee barnaamijka Deeqda Xasilita Daryeelka Ilmaha waxay uga baahan yihii gobolka inuu uruuriyo macluumaadka qofka ee ku saabsan bixiyaha daryeelka ilmaha ee qoyska, agaasimaha xarunta iyo hawladeenka xarunta barnaamijyada loo codsanayo lacagahaan. Labada su'aalood ee soo socda ayaa loo qaabeeeyay si loo buuxiyo shuruudan.

11. Midkee waxyaabaha soo socdasida ugu fiican u qeexaya bixiyaha daryeelka ilmaha ama hawladeenka barnaamijkaaga? (Hal qayb ama ka badan ayaa la dooran karaa)

- Hindida Mareykanka/Dhaladka Alaska
- Aasiyaan
- Madow ama Afrikan Ameerikaan
- Isbaanish ama Laatinka
- Dhaladka Hawaii ama Dhaladka Kale Jasiiradaha Baasifiga
- Caddaan
- Doorbid inaadan ka jawaabin

12. Waa maxay aqoonsiga jinsiga ee bixiyaha daryeelka ilmaha ama hawladeenka barnaamijkaaga?

- Lab
- Dhedig
- Aqoonsiga jinsi ee kale
- Doorbid inaadan ka jawaabin

Codsadayaashu waxay dooran karaan inay codsadaan iyadoo la buuxinayo halama in ka badan shuruudaha barnaamijkooda. Dhammaan su'aalaha la xiriira shuruudahagaarka ah waa in laga jawaabaa si loo go'aamiyo u-qalmitaanka sida ku cad shuruudahaas.

**Haddii aad rabto inaad codsato deeqda ku cad shuruudda 1, fadlan ka jawaab su'aalaha 13-15.**

**Shuruudda 1:** Xiritaanada la xiriira COVID kuwaasoo bixiyuhu helo wax ka yar 75% dakhligiisa billaha ah, oo ka kooban khidmadaha waalidka iyo, haddii lagu dabaqi karo, lacag-celinada laga helo Kaalmada Daryeelka Ilmaha iyo/ama barnaamijada deeqdaha waxbarasho ee Waxbarashada Hore

13. Immisa maalmood ayuu barnaamijkaagu xidhnaa iyadoo ugu wacan cudurka COVID ee la ogaaday ee barnaamijka ama u-baylah noqoshada tooska ah inta lagu gudajiray Maars 2022?

\_\_\_\_\_ Maalin

14. Waa immisa caddada guud ee lagu siiyay ee khidmadaha waalidka oo lagu daray caddadaaad ku soo dalacday Barnaamijka Kaalmada Daryeelka Ilmaha iyo Deeqaha Waxbarasho ee Waxbarashada Hore ee bishii Maars 2022?

\$ \_\_\_\_\_

15. Waa immisa caddada guud ee lagu siiyay ee khidmadaha waalidka oo lagu daray caddadaaad ku soo dalacday Barnaamijka Kaalmada Daryeelka Ilmaha iyo lacag-celinada Deeqaha Waxbarasho ee Waxbarashada Hore ee bishii ugu dambaysay ee aysan jirin xiritaanada la xiriira COVID ?

\$ \_\_\_\_\_

**Haddii aad rabto inaad codsato deeqda ku cad shuruudda 2, fadlan ka jawaab su'aalaha 16-18.**

**Shuruudda 2:** Laba bilood ama ka badan aan la bixinin lacagaha kirada ama amaahda guryaha

16. Immisa bilood ayaan hadda la bixinin kirada ama amaahda guryaha ee loogu talagalay goobta barnaamijka daryeelka ilmaha?

- \_\_\_\_\_
- Haa
  - Maya

17. Miyaad qaadatay deyn kaa horjoogsatay inaad laba bilood ama ka badan bixinin kirada ama amaahda guryaha ee loogu talagalay goobta barnaamijka daryeelka ilmaha?

- Bayanka biilka ee billihii ugu dambeeyay ayaa muujinaya 2 bilood ama ka badan haraa ah oo aan la bixin
- Warqadda laga helo mulkiilaha guriga, ijaaraha ama mulkiilaha amaahda guryaha oo muujinaysa inaad 2 bilood ama ka badan aadan bixin lacagaha
- Dukumeenti muujinaya kiradaada ama amaahdaada guriyeed inay dib u dhacday ama dib u dhigantay oo aad 2 bilood ama ka badan bixin lacagaha [ID = Forbear]
- Warqadda ama dukumeentiyada deynta ee laga helo asxaabta ama xubnaha qoyska oo tilmaamaysa caddada iyo shuruudaha la filayo ee dib u bixinta lacagta iyo dukumeentiyada helitaanka lacagaha (bayaanka bangiga, jeega, Venmo, Paypal, isweydaarsiga maaliyadeed ee Zelle) kugu socdo adiga ama si toos ah ugu socdo mulkiilaha gurigaaga ama mulkiilaha amaahda guryaha ee ka badan ama la midka ah 2 bilood oo kiro ama deyn ah [ID = Family]

- Sabab kale: \_\_\_\_\_
- Ma awoodo inaan keeno wax dukumeenti ah oo muujinaya 2 ama in ka badan oo kiro aan la bixinin ah ama amaaahda guriga ee goobta barnaamijka daryeelka ilmahayga

**Haddii aad rabto inaad codsato deeqda ku cad shuruudda 3, fadlan ka jawaab su'aalaha 19-22.**

**Shuruudda 3:** Khasaarahaa Hawgalka<sup>1</sup> ee (3) bilood ee la soo dhaafay ee buuxa oo u dhigma 25% ama ka badan dakhliga guud ee bixiyaha

<sup>1</sup>Khasaarahaa Hawgalka = Dakhliga Guud – Kharashaadka Hawgalka marka kharashaadka Hawgalka ay ka badan yihin dakhliga guud

**19. Muxuu ahaa dakhligaaga guud<sup>2</sup> ama kharashaadka Hawgalka<sup>3</sup> ee Janaayo 1, 2022, ilaa Maars 31, 2022?**

<sup>2</sup>Dakhliga guud = Dakhliga uu helo ganacsigaaga daryeelka ilmaha. Tani waxaa ku jira khidmadaha waalidka, Barnaamijka Kaalmada Daryeelka Ilmaha ee suurtogalka ah iyo lacagaha Deeqda Waxbarasho ee Waxbarashada Hore, deymaha, lacagaha deeqda ah (oo ay ku jiraan Deeqaha Xasilinta ee Gundhigga ah iyo Deeqaha Dhaqaale Xumada), iyo ilaha kale ee dakhli.

<sup>3</sup>Kharashaadka Hawgalka = Gaarka u ah xarumaha aan faa'iido doonka ahayn waa lacago laga qoondeeyo miisaaniyadda ururrada si loo taageero barnaamijka daryeelka ilmaha.

\$ \_\_\_\_\_

**20. Maxay ahaayeen kharashaadkaaga Hawgalka ee daryeelka ilmaha<sup>4</sup> ee Janaayo 1, 2022, ilaa Maars 31, 2022??**

<sup>4</sup>Kharashaadka Hawgalka = kharashaadka Hawgalka waxaa ku jira kharash kasta oo ganaci ee ku jira qaybaha hoose:

- Mashaarka
- Dheefaha(caafimaadka, ilkaha, caymiska aragga, biirtada hawlgabka, iwm.)
- Kharashaadka tababarka iyo horumarinta xirfadeed ee shaqaalaha
- Kharashaadka shaqaalaha ee kale
- Qalabka iyo agabka (softiweer/kumbuyuutar, adeegyada tiknoolajidda macluumaadka, agabka xafiisaya, iwm.)
- Kiro ama amaaahda guryaha<sup>5</sup>
- Kharashaadka xarunta (korontada iyo biyaha, caymiska, dayactirk)
- Qalabka Dhowra Shaksiga (PPE), oo ay ku jiraan agabka iyo adeegyada nadiifinta iyo fayo-dhowrka
- Cuntada
- Dhigaalada iyo hawlaha waxbarashada
- Kaalmada lacagta waxbarashada ee qoysaska
- Taageerooyinka caafimaadka dhimirka

<sup>5</sup>Bixiyeyaasha Daryeelka Ilmaha ee Qoyska ee Shatiga Haysta ayaa laga yaabaa inay isticmaalaan boqqollayda waqtiga-la haysto % ay u isticmaaleen canshuur-celinta dakhliga dawladda dhewe ee ay dhawaangudbiyeen si ay u go'aamiyaan qaybta kiradooda ama amaaahda guryaha ee loogu dari karo kharash ganaci ahaan.

\$ \_\_\_\_\_

**21. Muxuu ahaa dakhligaaga sanadlaha ah ee 2019, 2020, ama canshuur-celintaada 2021<sup>6</sup>? Bixiyaha ayaa laga yaabaa inuu isticmaalo midka badan 2019, 2020, ama 2021 ee tirooyinka faa'idada guud/dakhliga ganacsiga/dakhliga la cashuuri karo.**

<sup>6</sup>Saamaynada kala duwan ee safmarenka awgood bixiyayaasha ayaa isticmaali karaan canshuur -celintooda 2019, 2020 ama 2021 si ay u cadeeyaan dakhligooda. Bixiyayaasha waxay isticmaali karaan tiro kasta oo weyn. Tani waxay kordhinaysaa suurtagalnimada in bixiyaha uu ugu qalmo shuruudahan.

\$ \_\_\_\_\_

**22. Sanad-cashuureedkee ayaad isticmaashay si aad u go'aamiso dakhligaaga sanadlahaah?**

\_\_\_\_\_

## **Heshiiska lagu aqbalayo lacag-bixinta iyo shuruudaha maalgelinta**

Shuruudda helitaanka Deeqda Xasilita Dhaqaale Xumada Daryeelka Ilmaha ahaan, waa inaad muujisaa inaad ka warqabto oo aad u hoggaantsantay shuruudda ah in barnaamiskaagu sii shaqaynayay oo u adeegayay carruurta inta lagugudajiray muddada maalgelinta January 1, 2022, ilaa Maars 31, 2022. "Hawgalka" waxaal loola jeedaa in barnaamiskaagu lahaa shaqaale u diyaar ah daryeelka carruurta haddii sidaas ay codsadaan qoysaska diiwaangashan ama qoysaska raba inay iska diiwaangeliyan barnaamiskaaga, inta lagugudajiro saacadaha barnaamiskaagu shatiga u haysto inuu shaqeeyo iyo ilaa xadka inta barnaamiskaaga haysto shatiga, oo si cad loo sheego inay u furanayd qoysaska jira iyo weydiinayo.

Marka codsigaaga la helo oo la go'aamiyo in barnaamiskaagu xaq u leeyahay inuu helo lacag, waxaad heli doontaa ogeysiin maalgelin waxaadna heli doontaa lacag.

Haddii ay jirto calaamad muujinaysa inaad ku guuldareysatay inaad buuxiso shuruudaha la xiriira Deeqda Xasilita Dhaqaale Xumada Daryeelka Ilmaha, waxaad heli doontaa ogeysiis qoraal ah waxaana lagu siin doonaa fursad aad ku caddeyo iyo/ama ku saxdo wax kasta oo aan loo hoggaansamin. Ku guuldareysiga in la sameeyo sixitaanka loo baahan yahay, ama siinta macluumaad been-abuur ah ama marin habaabin ah Waaxda Adeegyada Aadanaha ee Minnesota (DHS) ee la xiriira shuruudaha maalgelinta, ayaa keeni karta joojinta lacagaha mustaqbalka, dib-u-hantiyida kis-kista lacago ee horay loo bixiyay, iyo/ama u gudbinta Xafiiska Kormeeraha Guud ee DHS si loo qaado tallaabo dheeraad ah oo la xiriirtaa lacagaha, heerka bixyeaha Barnaamiska Kaalmada Daryeelka Ilmaha, iyo shatigaaga, shahaadadaada, ama diiwaangelinta sida ku cad Xeerarka Minnesota, cutubyada 119B, 245A, 245E, 245H, iyo Xeerarka Minnesota, qeybta 245.095.

**23. Ma aqbashay bixintan Deeqda Xasilita Dhaqaale Xumada Daryeelka Ilmaha ee loogu talagalay ujeeddooyinka loo bixiyay oo ma aqbashay inaad buuxisay shuruudaha maalgelinta?**

- Haa
- Maya

## Isticmaalka Loogu Talagalay Lacagaha

24. **Lacagaha deeqda xasilinta waxaa kaliya loo isticmaali karaa ujeeddooyinka soo socda. Ujeeddadee(ujeeddooyinkee) ayaad u qorshaysay inaad u isticmaasho dlacagahaan deeqda ah, haddii lagu siyo?**
- Kharashaadka shaqaalaha, dheefaha, mushaar sare, iyo qorista iyo habalka shaqaalaha
  - Lacagaha kirada ama amaahda guryaha, korontada iyo biyaha, dayactirka iyo hagaajinta xarumaha, ama caymiska
  - Qalabka dhowra shakhsiga, agabka iyo adeegyada nadiifinta iyo fayo-dhowrka
  - Tababarka iyo horumarinta xirfadeed ee la xiriirta hawlaha caafimaadka iyo badqabka
  - Iibka ama cusboonaysiinta qalabka iyo saadka si looga falceliyo COVID-19
  - Alaabta iyo adeegyada lagama maarmaanka u ah in la joogteeyo ama dib loo bilaabo a deegyada daryeelka ilmaha
  - Taageerada caafimaadka maskaxda ee loogu talagalay carruurta iyo shaqaalaha

## Ururinta Macluumaadka Cashuurta

Si aad u bixiso oo aad boostada ugu soo dirto lacagtaada waa inaad bixisaa Lambarka Aqoonsiga Loo-shaqeeyaha ee Dawladda Dhexe (FEIN) ee barnaamijkaaga oo wata magaca ganacsiga ee la xiriira ama Lambarka Sugnaanta Bulshada ee mulkiilaha/hawladeenka barnaamijkaaga oo wata magaca hore iyo magaca dambe ee sharciga ah. Macluumaadkan waxaa loo isticmaali doonaa in lagu soo saaro Foomka 1099 ujeedooyin canshuureed awgood dhammaadka 2022.

25. **Barnaamijkaagu ma leeyahay Lambarka Aqoonsiga Loo-shaqeeyaha ee Dawladda Dhexe?**
- Haa
  - Maya (Hadday maya tahay, u bood su'aasha 28)
26. **U bixi Magaca Ganacsiga ee barnaamijkaaga sida uu uga muuqdo foomkaaga W-9 ama dukumentiyada kale ee canshuuraha ee dawladda dhexe:**
- 
27. **Bixi lambarka Aqoonsiga Loo-shaqeeyaha ee Dawladda Dhexe (FEIN) ee barnaamijkaaga. Lambarka Aqoonsiga Loo-shaqeeyaha ee Dawladda Dhexe (FEIN) waa inuu la mid noqdaa magaca ganacsiga ee ku jira su'aasha 26 ee sare. FEIN waa inuu u qornaado qaabka XX-XXXXXXX ama XXXXXXXX:**
- 
- Kaliya ka jawaab su'aalaha 28 ilaa 30 haddaad kaga jawaabtay "maya" su'aasha 25.*
28. **Bixi magaca KOOWAAD ee Shati-haystaha ee sharciga ah ee barnaamijkaaga. Keliya hal magac ayaa loo baahan yahay hadday jiraan dad haysta shatiyo badan:**
- 
29. **Bixi magaca UGU DAMBEEYA ee sharciga ah ee shati haystaha ee barnaamijkaaga. Keliya hal magac ayaa loo baahan yahay hadday jiraan dad haysta shatiyo badan:**
-

**30. Bixi lambarka Sugnaanta Bulshada ee Shati-haystaha ee barnaamiskaaga. Keliya hal lambar ayaa loo baahan yahay hadday jiraan dad haysta shatiyo badan. Lambarka Sugnaanta Bulshada waa inuu u dhigamaa magacyada ku jira su'aalaha 28 iyo 29. Lambarka Sugnaanta Bulshada waa inuu u qornaado qaabka XXX-XX-XXXX ama XXXXXXXX:**

---

## Caddaynta

Si aad xaq ugu qalmato inaad codsato oo aad hesho Deeqda Xasilinta Dhaqaale Xumida Daryeelka Ilmaha, barnaamiskaagu wuxuu ka marag kacayaa oo aqbalayaa waxyaabaha soo socda:

- Barnaamijkaygu wuxuu shaqaynayay oo u adeegayey carruurta inta lagu gudajiray muddadii u-qalmitaanka maalgelinta Janaayo 1, 2022, illaa Maars 31, 2022.
- Barnaamijkaygu wuxuu shati qaatay oo shaqaynayay ugu yaraan lix bilood.
- Barnaamijkaygu wuxuu aqbalayaa inuu u isticmaalo lacagahaan mid ama in ka badan oo ka mid ah ujeeddooyinka soo socda:
  - Kharashaadka shaqaalaha, dheefaha, mushaar sare, iyo qorista iyo habalka shaqaalaha
  - Lacagaha kirada ama amaahda guryaha, korontada iyo biyaha, dayactirka iyo hagaajinta xarumaha, ama caymiska
  - Qalabka dhowra shakhsiga, agabka iyo adeegyada nadiifinta iyo fayo-dhowrka
  - Tababarka iyo horumarinta xirfadeed ee la xiriirta hawlaha caafimaadka iyo badqabka
  - Iibka ama cusboonaysiinta qalabka iyo saadka si looga falceliyo COVID-19
  - Alaabta iyo adeegyada lagama maarmaanka u ah in la joogteeyo ama dib loo bilaabo adeegyada daryeelka ilmaha
  - Taageerada caafimaadka maskaxda ee loogu talagalay carruurta iyo shaqaalaha
  - Dib-u-bixinta mid kasta oo ka mid ah isticmaalka kor ku xusan, oo la bixiyo inta u dhaxayso Janaayo 31, 2020 iyo Sitembar 30, 2023 taasoo aan horay looga bixinin lacagaha kale dawladda dhexe, gobolka, qabiilka ama lacagaha guud ee deegaanka.
- Barnaamijkaygu wuxuu oggolaanayaa:
  - Markuu furan yahay oo bixinayo adeegyada, inuu hirgeliyo siyaasadaha waafaqsan hagista iyo amarrada u dhigma kuwa gobolka, qabiilka, iyo maamulada deegaanka iyo, ilaa iyo inta ugu badan ee suurtogalka ah, hagista Xarumaha Xakamaynta iyo Kahortagga Cudurrada (CDC) (laga heli karo barta <https://www.cdc.gov/coronavirus/2019-ncov/community/schools-childcare/index.html>).
  - Bixinta ugu yaraan isla caddada gunnada toddobaadlaha ah oo joogtee dheefaha la midka ah (sida caymiska caafimaadka iyo hawlgabka, hadduu ku khuseyso). Gaar ahaan, tani waxay ka dhigan tahay in bixiyayaasha ay tahay inay joogteeyaan mushaarka iyo dheefaha shaqaalaha ee toddobaadlaha ah:
    - inta lagugudajiro barnaamijka ama fasalka COVID uu sababay in la xiro
    - kuwaasoo karantiilka galay kadib markii laga helay COVID

- kuwaasoo is-go'doomiyay kadib markay u-baylah noqdeen COVID, haddii ah bixiyayaasha leeyihin siyaasado gudaha ah oo dhigaya inaysan joogeyn doonin gunnada shaqaalaha aan tallaalmay ee u-baylah noqdeen COVID mooyee
- Bixiyayaasha waxay raaci karaan siyaasadaha gudaha ee aan la xiriirin xaaladaha jirro COVID.
- Ka warbixi/ka cusbooneysii awoodda macluumaadka ee barnaamijka, ugu yaraan lixdii toddobaadba mar, iyadoo loo sii marayo bixiyaha Aaladda Wargelinta Ganacsiga ee Bixiyaha barta <https://mnpbu.naccraware.net/#!/login>. Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan shuruudahan, fadlan tixraac [bogga mareegta Su'aalaha Inta badan Lana Weydiyo \(FAQs\) ee Deeqda Xsilinta Dhaqaale Xumada](#).

- Barnaamijkaygu **MA** oggolaanayo in:
  - si aan ikhtiyaari ahayn shaqada looga cayriyo ama looga joojiyo shaqaalaha
  - loo isticmaalo lacagahaan in lagu bixiyo cashuuraha (marka laga reebo cashuuraha mushaarka, kuwaasoo la oggolyahay).
  - loo isticmaalo lacagahaan in lagu bixiyo alaabta ay horay lacagteeda u bixiyeen dawlaadda dhexe, gobolka, qabiilka iyo/ama maalgaalinta guud ee deegaanka.

## Muddada Maalgelinta Iyo Muddada Caddaynta

Waan fahamsanahay haddii barnaamijkayga la go'aamiyo inuu u qalmo, in lacagaha hal mar la wada bixin doono iyo in caddayntan loogu talagalay muddada Janaayo 1, 2022, ilaa Maarso 31, 2022.

## Wadaagista Xogta

Waan fahamsanahay in markaan saxiixo heshiiskan, inaan u oggolaanayo Waaxda Adeegyada Aadanaha ee Minnesota inay macluumaadka ula wadaagaan hay'adaha qandaraaska lagula jiro iyo danwadaagta kale ee hay'adaha gobolka ujeeddooyinka soo socda, si:

- Loo bixiyo geedi-socodka codsiga maalgelinta.
- Loo falanqeeyo xogta isticmaalka lacagaha.
- Loo falanqeeyo waxtarka geedi-socodka bixinta Barnaamijka Deeqda Xasilinta Daryeelka Ilmaha.

Waan fahamsanahay in macluumaadka aan gudbiyay ee codsigan loo tixgelinayo mid guud, haddii ay suurtogal tahay in lagu aqoonsado carruurta ku jirta barnaamijkayga mooyee ama haddii loo tixgeliyo xogta gaarka ah ee shakhsiyeed, sida lambarka telefoonka, ciwaanka iimaylka, lambarka sugnaanta bulshada, ama xogta kale ee lagu sifeeyay mid gaar ah ee hoos yimaada Xeerka Habdhaqanka Xogta ee Dawladda Minnesota.

## Qeybinta Lacagta

Marka la xaqiijiyo u-qalmitaanka, lacag ayaa loogu diri doonaa shati-haystaha ciwaanka ku qoran su'aalaha 3-5.

## Saxiixa

Waxaan ka marqaati kacaya oo caddaynayaa inaan xaqiijiyay in macluumaadka kor lagu bixiyay yahay mid run ah oo sax ah. Waan fahamsanahay in haddii aan si ula kac ah u soo gudbiyo macluumaad been-abuur ah ama khiyaano ah inta lagu gudajiro geedi-socodka codsiga maalgelinta ama markaas kadib, oo ay ku jirto caddayntan, barnaamijkaygu dib dambe uma sii ahaan doono mid u qalma lacagaha mustaqbalka waxaana laga yaabaa in lagugu qaado ciqaabaha dembiyada iyo madaniga ah, oo ay ku jiraan balse aan ku xaddidnayn dib-u-bixinta ee lacagaha horay loo helay.

### Fadlan saxiix oo taariikhee qaybta hoose

Saxiixa: \_\_\_\_\_

Taariikhda saxiixa: \_\_\_\_\_

**TUSAAL**